# Macluumaad ku saabsan xanuunka koronavirus

## Barta internetka Helsenorge.no

Barta internetka ee helsenorge.no waxaad ka helaysaa warbixinaha ugu dambeeya, uguna sugan ee xanuunka koronavirus. Boggan waxaad kaloo ka helaysaa macluumaadka saxa ah ee xanuunka, talooyin, macluumaad ku saabsan calaamadaha xanuunkan lagu garto, muddada u dhexaysa marka xanuunku qofka ku dhaco illaa inta uu calaamadaha xanuunka isku arkayo, hab-daawaynta xanuunka, safarrada qofka qaba xanuunka, dhacdooyinka lagu qabto meelaha dadku isugu yimaaddo iyo tallaabooyinka lagaga hortago xanuunka.

Riix barta internetka ee helsenorge.no oo ka hel macluumaadka xanuunka koronavirus-ka

## Barta internetka ee hay´adda caafimaadka dadka (Folkehelseinstituttet) fhi.no

Mar walba macluumaadka ugu dambeeya, uguna sugan waxaad ka helaysaa barta internetka ee hay´adda caafimaadka dadka(folkehelseinstituttettet) Fhi.no. Halkan waxaad ka helaysaa xanuunka, talooyin, macluumaad ku saabsan calaamadaha xanuunkan lagu garto, muddada u dhexaysa marka xanuunku qofka ku dhaco illaa inta uu calaamadaha xanuunku isku arkayo, hab-daawaynta xanuunka, safarrada qofka qaba xanuunka, dhacdooyinka lagu qabto meelaha dadku isugu yimaaddo iyo tallaabooyinka kahortagga xanuunka.
Riix oo ka hel macluumaadka xanuunka koronavirus barta internetka ee inn fhi.no

## Telefoonka warbixinaha ee Agaasinka caafimaadka (Helsedirektoratet) 815 55 015

Haddii aad halkan ka waydo jawaabta aad raadinayso, waxaad wici kartaa telefoonka warbixinaha ee Agaasinka caafimaadka. Halkaa ayaad ka helaysaa jawaabaha wixii su´aalo guud ah, sida tusaale ahaan calaamadaha xanuunka iyo meelaha xanuunku uu ku faafay.
Wac telefoonka warbixinaha ee Agaasinka caafimaadka 815 55 015

# Ma iisaga shakisantay in aad qaadday xanuunka.?

Haddii aad iisaga shakido in aad qaadday koronavirus-ka, waa in aanad tegin ee aad wacdaa dhaktarkaaga (fastlege) ama xarunta dhakhaatiirta heeganka(legevakt).

# **Shuruudaha qofka laga tijaabinayo xanuunka**

Dadka guryaha karanteenada ku ah laga tijaabin maayo xanuunka, mana aha in ay dadkaasi xarumaha caafimaadka la xiriiraan – haddii aan wax xanuuni hayn. Tijaabinta waxaa loogu talagalay dadka xanuunsada qaar iyo shaqaalaha caafimaadka kuwooda ka cawda cunaha iyo dhuumaha naqas mareenanda

Halkan riix oo ka eeg talooyinka ugu dambeeya ee Hay´adda caafimaadka dadk(Folkehelseinstituttet) bixiso

# Wac telefoonka xanuunka koronavirus-ka ee loogu talagalay dadka deggan Oslo 21 80 21 82

Waxaad wici kartaa telefoonkan si loo qiyaaso in xanuunka lagaa tijaabiyo, waa haddii aad

- isku aragto calaamadaha xanuunka lagu garto
- tagtay meelaha xanuunkani ka jiro
- xidhiidh dhow la yeelatay qof/dad xanuunkani ku dhacay

Waqtiyada telefoonka: maalmaha shaqada 12:00 - 21:00, sabtiyada/axadaha 12:30 - 19:30.

Dad badan ayaa soo waca koronatelefoon-ka, haddii aad jirrato aanad se isku arag calaamadaha xanuunka waxa lagaa codsanayaa in aanad gurigaaga ka bixin, dad badanna aanad la xidhiidhin. Qof kasta oo isku arka calaamadaha hargabka ma aha inuu koronatelefon-ka soo waco.

Wac koronatelefon-ka dadka Oslos deggan 2180 2182.

# Wac dhakhtarkaaga (fastlegen)

Wac dhakhtarkaaga markaad talo caafimaad u baahato. Dhakhtarkaaga ayaa warqadda jirrada (sykemelding) ku siin kara, haddii ay noqoto in aad guriga karanteeno ku ahaato koronavirus dartii, Mar walba dhakhtarkaaga ayaad kala xiriiraysaa wixii aan ahayn jirro/caawimo caafimaad oo deg-dega, ha ahaato xanuunka koronavirus-ka ama jirro kale.

## Wac xarunta dhakhaatiirta heeganka (legevakten) wixii xanuun/caawimo caafimaad ee deg-deg ah

Haddii aad jirrato oo aad waydo dhakhtarkaaga waxaad wici kartaa xarunta dhakhaatiirta heeganka (legevakten) telefoon 116117.

Waxa keliya oo aad wacaysaa xarunta dhakhaatiirta heeganka(legevakt) marka ay timaaddo caawimo caafimaad oo deg-deg ahi. Waxaa lagu jiraa xilligii qaboobaha, sidaa darteed qof kasta oo cunaha iyo dhuumaha naqaska ka cawdaa ma aha in uu u qaato in xanuunkii koronavirus-ka uu ku dhacay. Ha tegin dhakhtarkaaga iyo xarunta dhakhaatiirta heeganka(legevkt) midna adiga oo aan marka sii wicin. Haddii nafta iyo caafimaadku khatar galaan wac 113.

## Dhammaan iskuullada iyo xannaanooyinka Oslo waa xidhan yihiin

Dhammaan iskuullada iyo xannaanooyinka Oslo waa xidhan yihiin. Marka koowaad waxay xidhnaan doonaan 14 maalmood.

Dhammaan iskuullada iyo xannaanooyinka way xidhan yihiin. Marka koowaad waxay iskuullada iyo xannaanooyinku xidhnaan doonaa illaa 26ka maarso 2020ka Waxaana dhici karta in la sii kordhiyo muddada.

Iskuuladu intii awooddooda ah waxay ardayda duruusta ugu diri doonaan guryaha.

Go´aankani wuxuu khuseeyaa:

- Iskuullada hoose
- Iskuullada dhexe
- Iskuullada sare
- Dugsiyada waxbarashada dadka waawayn
- Xannaanooyinka
- Meelaha iskuullada ee ardayda lagu hayo xiisadaha ka hor iyo ka dib(Aktivitetsskolen)

Halkan riix oo ka hel sidaad ula xidhiidhi lahayd Agaasinka waxbarashada(Utdanningsetaten)